



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**Golaha Shacabka**

***QARAAR BAARLAMAANI AH***

***RESOLUTION***

**GO'AAN GOLAHA SHACABKA OO LA XIRIIRA DHACDADII NAXDINTA  
LAHEYD EE LAGU DILAY SIDDEED ODAY-DHAQAMEED DEEGAAN HOOS  
YIMAADA DEGMADA BUURHAKABO 23<sup>kii</sup> MAARSO 2014.**

**Muqdisho, 2<sup>da</sup> Abril 2014**

## Golaha Shacabka

**Markuu arkay** Qodobka 15aad (Xorriyadda iyo Nabadgelinta Qofnimada) ee Dastuurka;

**Markuu arkay** Qodobka 99aad (f) ee awoodda iyo waajibaadka Golaha Wasiirada ee sugidda nabadgeliyada;

**Markuu arkay** Qodobka 126aad (1) oo u qoran “Xukuumadda Federaalku waxay damaanad-qaadaysaa nabadda, gobannimada iyo ammaanka qaranka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo bedbaadinta shacbigeeda, iyadoo la adeegsanaayo adeegyada ciidammada amniga”;

**Markuu arkay** waajibaadka Golaha Shacabka ee ku qeexan qodobka 69aad ee Golaha Shacabka;

**Kalfadhiga 4aad kulankiisa 5aad ee taariikhdu 02/4/2014 wuxuu guddoonsaday qaraarkan:**

**Wuxuu** si balaaran u cambaareynaya falkii waxishnimo ee lagu dilay siddeed oday-dhaqameed deggaan ka tirsan degmada Buurhakabo ee Gobolka Baay, odyaasha oo ka soo safray degmada Baydhabo ee xarunta Gobolka Baay iyaga oo u soo socday deegaankooda No. 50 ee Gobolka Shabeelaha Hoose;

**Wuxuu** Xukuumadda faraya inay u saarto guddi baaris oo warbixin buuxda ka soo diyaariya xogta dhabta ah ee dhacdadaas naxdinta leh, una soo hordhigga Golaha Shacabka muddo 15 maalmood gudaheed ah;

**Wuxuu** Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka ku wargalinaya in Wasiiradda Amniga iyo Gaashaandhingga qoraal ku ogeysiyo inay Golaha Shacabka horyimaadaan 15 maalmood gudaheed si ay u soo bandhigaan qorshahooda ay ku damaanad qaadayaan nabadgeliyada shacabka ee ku safraaya deegaanada dowladu ka taliso si waafaqsan qodobka 126aad ee Dastuurka;

**Wuxuu** Golaha Shacabku farayaa Xukuumadda inay ilaalso xaqa helidda maclummaadka si waafaqsan qodobka 32aad ee dastuurka oo ay shacabka ugu soo bandhigeyso maclummaad digniin joogta ah, laguna kalsoonaan karo oo ujeedkeedu yahay badbaadada qofka iyo hantidiisa, gaar ahaan heerka amaanka jidadka isku xira degmooyinka iyo gobolada dalka iyada oo la adeegsanayo warbaahinta;